

## Far-qaadista Kusalaysan Baaritaanka Asalka Oggaysiis Fingerprint-Based Background Check Notice

### Macluumaad kusaabsan far-qaadistaada kusalaysan baaritaanka asalka:

1. Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada waxay u baahantahay in aad dhammaystirtid far-qaadista kusalaysan baaritaanka asalka. Baaritaanadaan far-qaadista kusalaysan asalka waxaa loogu baahanyahay qaanuuno baddan oo gobolka ah, ay ku jirto RCW 43.43.837.
  2. Far-qaadistaada waxaa loo isticmaali doonaa si loogu baaro diiwaanada taariikhda dembiyeed kuwaas oo ku jira Ilaalada Gobolka Washington (WSP) iyo Maktabka Baaritaanka Federaalka (FBI). Marka la dhammeeyo baaritaanka far-qaadista, waxaad heli kartaa nuqul kusaabsan natiijada baaritaankaaga asalka adiga oo buuxiya Codsiga Codsadaha ee loogu talagalay Nuqul kusaabsan foomka Macluumaadka Baaritaanka Asalka (DSHS 27-110).
  3. Haddii aad aaminsantahay in natiijoyinka baaritaanka asalkaaga aanan dhammaystirnayn ama ay khaldanyihiin, waxaad fursad u haysataa in aad dhammaystirtid ama uga hortagtid sax ahaanta macluumaadka sida hoos loogu sheegay.
    - a. Oggaysiiska baaritaanka asalka wuxuu sheegayaa sida loo saxo macluumaadka laga bixiyay dhinaca xoggag kasta oo warbixin oo BCCU ah ee hoos lagu qoray:
      - Kashifaada-Nafta Codsadaha
      - Waaxda Sixitaanada (DOC)
      - Waaxda Caafimaadka (DOH)
      - Maktabka Baaritaanka Federaalka (FBI)
      - Maxkamadaha Washington
      - Ilaalada Gobolka Washington (WSP)
      - Tallaabado Aan Ficnayn: Maamulka Muddada-dheer iyo Da'weynaanta (ALTSA) / Barnaamijka Ilaalada Macamiilka iyo Qofka meesha degan; ALTSA / Adeegaha Ilaalada Qofka wayn; Adeegaha Ilaalada Ilmaha; Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) / Maamulka Carruurta
    - b. Waxaa jira labbo qaab oo lagu saxayo macluumaadka ku qoran Diiwaanka Aqoonsiga Maktabka Baaritaanka Federaalka:
      - La xiriir wakaalada gobolka ama dowlada ama wakaaladaha siiyay macluumaadka Maktabka Baaritaanka Federaalka; ama
      - U dir codsi ka hortag qoran dhinaca Waaxda Adeegaha Macluumaadka Cadaalada Dambiga Maktabka Baaritaanka Federaalka (CJIS) adiga oo ugu qora cinwaanka soo socda:  
 FBI CJIS Division  
 Attention: SCU, Module D-2  
 1000 Custer Hollow Road  
 Clarksburg, WV 26306
- Codsigaaga qoran ee loo diro dhinaca Maktabka Baaritaanka Federaalka waa in uu si cad u sheego macluumaadka aad u aragtid in aysan sax ahayn ama aan dhammaystirnayn waana in aad ku dartid nuqulada wax kasta oo dukumeentiyo caddayn la heli karo kuwaas oo taageeraya sheegashadaada. Tusaale ahaan, haddii macluumaadka kusaabsan waxa ku dhacay eedaynta dambiga adiga laguugu eedeeyay ay tahay mid aan sax ahayn ama meesha ka maqantahay, waxaad soo diri kartaa dukumeenti ka ahaada maxkamada ama sarkaalka xukumey dambiga. Kooxda Warcelinta waxay la xiriiri doontaa wakaaladaha munaasabka ah si ay isugu dayaan in ay xaqiijiyaan ama saxaan warbixinta laga hor yimid ee adiga kugu saabsan. Marka Maktabka Baaritaanka Federaalka uu ka helo xiriirka rasmiga ah wakaalada ay la jirto awooda maxkamadeed ee arinta kusaabsan, Maktabka Baaritaanka Federaalka wuxuu samayn doonaa isbedelo munaasab ah wuxuuna kugu soo wargelin doonaa natiijada. (Hawshaan waxaa lagu sharxay gudaha 28 C.F.R. § 16.34.)
4. Qoraalka Qaanuunka Khaaska ah ee Maktabka Baaritaanka Federaalka (FBI) waxaa laga helayaa gudaha bogga internetka Maktabka Baaritaanka Federaalka <https://www.fbi.gov/services/cjis/compact-council/privacy-act-statement>.

### Marka aan sixiixo oggaysiiskan Waxaan qirayaa in:

Aan helay nuqul kusaabsan oggaysiiskan sababtoo ah Aniga waxaa la iiga baahanyahay in aan sameeyo far-qaadis kusalaysan baaritaanka asalka. Qofka ama hay'ada codsatay baaritaanka asalka waxaa looga baahanyahay in ay haystaan nuqul kusaabsan oggaysiiskan sixiixan si ay uga dhigtaan mid ay ku keydsadaan diiwaanadooda oona igu soo celiyaan oggaysiiska asalka ah. Waxaa la igu soo wargelin doonaa natiijada baaritaankayga asalka marka qofka ama hay'ada codsatay baaritaanka asalka ay helaan oggaysiiska natiijada far-qaadista ugu dambaysa.

TAARIIKHDA

SIXIIXA CODSADAHHA

MAGACA QORAN